# Golaha Wakiilada JSL

## Waaxda Shuruucda, Hadal-qoraalka iyo Fadhiyada

### Golihii 5aad Kal-fadhigii 13aad, Fadhigii 7aad

**20 December 2025**

**Quraanka: -** Md. Sh. Axmed Dayib.

**Gudoonka: -** Siciid Mire Faarax (Giire)

**Ajandaha Fadhiga:-** Doodda Wax ka badelka iyo Kaabista Xeerka Maalgashiga

**Gudoomiyaha:-** Mudanayaal, sidaynu u balansanayn fadhigan maanta waxaynu bilaabaynaa doodda Xeerka maalgashiga oo Madaxweynuhu inoo soo gudbiyay, gudidda arrimaha dibaduna ka soo shaqaysay, marka mudanayaasha ka qayb-galayaa ha is qoraan doodda.

**Md. Cabdikariin Maxamed Muxumed (7min, 4sin):-** Bismilaahi Raxmaani Raxiim Gudoomiye ku xigeenka 1aad ee Gollaha wakiilada ahna ku simaha Gudoomiyaha Gollaha, xildhibaanada Gollaha wakiilada, shaqaalaha Gollaha Asalaamu calaykum waraxmatulaah wabarakaatu, waad mahadsan tahay Gudoomiye, markaan ku soo dhawaado dooda wax ka bedelka seddexda Qododob ee wax laga soo bedelay Xeerka maalgashiga **Qodobka 17aad** ee ay Guddidu soo jeedisay in Xadiga maalgashiga laga dhigo 300,000 USD (sedex Boqol kun doolar) **waxaan soo jeedinayaa in 200 oo kun oo dolar laga dhigo.**

**Qodobka 23aad** ee Xeerka maalgashiga ee wax laga soo bedelay oo ay soo jeedisay xukuumadu in maalgaliye kasta la siiyo shahaadada maalgashiga, maalgaliye kasta oo la siiyay shahaadada maalgashigu waxa uu xaq uleeyahay cashuuraha macaashku-macaashka oo u dhigma 100% 3 sanno ee hore ee ka bilaabmaya marka uu mashruuca maalgashigu uu shaqada bilaabo 50% ee shanta sano ee ku xigta **Qodobkaa waan ku Raacsanahay.**

**Qodobka 24aad** cashuur-dhaafka soo dejinta Qalabka, maalgashade kasta oo la siiyay shahaadada maalgashigu waxa uu xaq uu u leeyahay cashuur-dhaaf cashuurta kastamka oo ah 100% ee la xidhiidha soo dejinta alaabta caydhiin, alaabooyin kale oo loogu talagalay wax-soo saarka 3 sanno ee ka bilaabmaysa marka uu mashruuca uu shaqadu uu bilaabmo, markaa halkan waxay xukuumadu soo jeedisay in alaabtaa caydhiin ay muddo cayiman ay siiso laakiin warshadaha dalku wey kordhayaan waxaynu u baahanahay in wax- soo saarka dalka had iyo jeer laga fikiro mudadii hore ee dalkani soo kobcayay warshadihii la bilaabey waxay ku soo shaqeeyeen waqti adeg, oo aduunyada kale marka laga hadlayo warshadaha waxaa la siiyaa Tasiilaad badan oo ay u baahan yihiin si wax- soo saarka gudaha lagu

farsamaynayo oo ay warshaduhu ka qaybqaataan shaqo abuurka, kobaca dhaqaalaha, iyo lacagtii adkayd ee dalka ka bixi jirtay.

Sidaa marka ay tahay maadaama oo ay shaqo abuurkii dalka ka qayb qaadanayaan oo ay warshad kastaa ay hayso shaqaale badan oo shaqaalihii dalka ah, waxa kale oo ay ka qayb qaadanayaan lacagtii adkayd ee dalka ka baxaysay, maadaama oo Tamarta iyo Energyga ay isticmaalayaan ay qaali tahay oo ay ahayd wax yaabihii ay ahayd in ay qiimo jaban ay ku helaan warshaduhu oo tusaale ahaan wadanada jaarka, wadamada aduunyada dhiiri galin baa loo sameeyaa waxaa loo diyaariyaa "Aaga warshadaha oo had iyo jeer laga caawiyo sida dhimaha iyo koronto jaban, oo warshadahaasi eeriyadii loo cayimay ama aagii warshadaha kuwada yaalay oo magaalo kasta ama Gobol kasta meel gaar ah looga sameeyo.

Mudane gudoomiye warshaduhu hadii ayna maanta haysan waxyaabihii lagu taageeri lahaa, **waxaan soo jeedinayaa in Qodobkaa sidiisii hore loo daayo oo Alaabta caydhin ay ku helaan cashuur dhaaf**, hadii kale warshadahaasi wey xidhmayaan shaqaalihii ay hayeen, oo ah shaqaalihii wadankan udhashayna meesha ayay ka bixi doonaan cashuurtii lafilayay in ay korodhaana meesha ayay ka bixi doontaa, markaa inta aynu udiyaarinayno warshadaheena koronto jaban in ay helaan Tasiilaadkii ay u baahnaayeen, dhiiri galin, iyo wax-yaabihii ay xaqa ula haayeen marka aynu ubaahan nahay warshadaheenu in ay latartamaan wadamada jaarka suuqa aynu ku xisaabtamaynaa uu yahay suuqa dalalka jaarka ah waxaan soo jeedinayaa wixiii macaashtul- macaash ah in laga qaado lagula xisaabtamo oo dawlada dakhli uga soo xaroodo, hadii alaabtii qaydhnayd laga cashuuro waxay noqonaysaa in warshadaheenii culays badan oo ayna manta qaadi Karin ku soo kordho isla markaana ay halkaa ku joogsadaan, warshado kale oo soo kordhaana ayna jireen qofka maalgashada ahi warshadihii hore maxaa laga yeelay, maxay heleen.

Waxaan soo jeedinayaa **Qodobka 24aad** ee cashuu-dhaafka ee soo dejinta qalabka maalgashade kasta oo helay shahaadada maalgashiga in laga qaado cashuurta macaashul-macaashka **sidaa ay soo jeedisay xukuumadu balse arrinta alaabta caydhin ee qodobkan lasoo jeediyay in laga joojiyo, oo ay sideedii hore ay ahaato inta ay ka helayaan Tasiilaadkii** ay u baahnaayeen warshaduhu iyo maalgashadayaashu, xeerka maalgashigu dhawr sector buu ka hadlayaa, macdanta, Beeraha, kaluumaysiga, anigu qaybtaan ka hadlayo waxa weeye in sidii hore ay u ahayd alaabta caydhiin hadii kale culays bey ku keenaysaa warshadaha markaa shaqo abuurkii baa meesha ka baxaya markaa doodayda waxaan ufaaf-faahinayaa gudoomiye in cidii u baahani fahamto cidii igu taageeraysaa soo jeedintayda hadii kale waxay noqon doontaa in warshadahaasi meesha ay ka baxaan dhaqaalihii iyo cashuurtii Gudaha kasoo xaroonaysay sida warshadaha laga qaadayay ee macaashtul-macaashka laga qaadayay, cashuurta iibka ee warshadaha laga qaadayay ay meesha ka bixi doonto sababtuna waxa weeye ma haystaan Tasiilaadkii loo baahna sida

Tamarta waana ku qaali lacag badan beyna ku joogtaa, markaa soo jeedin taydu waa qodobkaa nuxurkiisu.

**Md. Aamina Cilmi Fariid** ***(1min, 49sec):-*** -Bismilaahi Raxmaani Raxiim khibrad ayaan u leeyahay maalgashiga waayo wasiir maalgashi ayaan soo noqdey waxyaabo waxaa jira aan u ogahay piratical warshadaha iyo cida kale ee maalgashanaysa dalka waxay qabaan dhib farabadan waxayna ay tahay raw materiyalka ay keenaan waxay ku soo iibsadaan harad carency dalka markay keenaan cashuur-dhaafkii ay xaqa u lahaayeen ma helaan aniga waa soo jeedin waxaan ka hadlayaa iyo khibradayda ayaan ka hadlayaa markaa waxaa haboon in xeerkan hoos loo eego oo Guddidu waxay soo jeedisay hoos loo eego oo xildhibaanadu shacabkani waa shacabkii soo doortay hadii ay wax dhibayaan in ay dadka ka qabtaan hadii la dhibayana in ay wixii qaldan saxaan, **markaa waxaan odhan lahaa maalgashadayaasha iyo warshaduhuba waxay u baahan yihiin in raw materialka iyo mshiinada sidii hore ee ay ahayd dawladii tan ka horaysay ee madaxwayne muuse biixi uu u ogolaadey in cashuur dhaaf loo sameeyo in halkaas lagu hayo ayaa aniga ila haboon.**

**Md. Cali Jaamac Caraale (cali-Qaran) (4min, 25sec): -** Bismilaahi Raxmaani Raxiim gudoomiyaha iyo dhamaan mudanayaasha sharafta leh waxaan idinku salaamayaa salaanta islaaamka Asalaamu-calaykum waraxmatulaahi wabarakaatu, Qodobadii koobnaa ee ay soo gudbiyeen Guddidu inkasta oo aan soo akhriyay xeerka waxaan qabaa in aan ku koobnaado dhawrkaa qodob ee ay Guddigu lifaaqa ku soo sameeyeen.

**Qodobka 17aad** oo aan u kala saaray laba Qodob maalgaliye kasta oo wadani ah halkaa labo qodob ayaan ukala dhigay Qodobka 1aad oo kala ah wadani iyo shisheeye, markaa waxaan idhi maalgaliye kasta oo wadani ah si uu u sameeyo maalgashi xeerkan waafaqsan waxaa looga baahan yahay in uu ku maalgaliyo Raasamaal dhan 100 kun USD ah ama lacag udhiganta shilinka Somaliland ah halkii mashruuc ee maal gashi ah.

**Qodobka 2aad** maalgaliye kasta oo shisheeye ah si uu usameeyo maalgashi xeerka waafaqsan waxa looga baahan yahay in uu ku maalgaliyo Raasamaal dhan 400 kun USD ah Guddigu waxay inoo soo gudbisay 300kun USD ah ama lacag udhiganta oo shilinka Somaliland ah halkii mashruuc ee maalgashi.

**Qodobka 24aad faqradiisa 1aaad** waan ku waafaqay Guddiga oo u dhigan maalgashade kasta oo lasiiyay shahaadada maalgashiga waxa uu xaq uleeyahay in uu helo cashuur-dhaaf ah cashuurta soo dejinta oo ah 100% ee la xidhiidha qalabka soo dejinta iyo helida mashruuca maalgashi qodobkaa waanku waafaqay Guddiga.

**Faqrada 2aad ee Qodobka 24aad** qodobkaasi waxa uu u dhigan yahay maalgashade kasta oo la siiyay shahaada maalgashiga waxa uu xaq uu u leeyahay in uu helo cashuur-dhaaf cashuurta kastamka oo ah 100% ee la xidhiidha soo dejinta alaabta ceydhin alaabooyinka kale ee loogu talo galay waxsoosaarka, **waxay Guddidu soo qortay 3** sanno **ayay soo**

**qoreen laakiin anigu waxaan idhi 5 sanno hala siiyo maalgashadaha si uu waqtigu ugu yar dheeraado laba sano** oo said ah ayaan ugu daray halkaa.

**Sidoo kale waxaan ku waafaqay Gudiga qodobka ay ku dareen ee ay yidhaahdeen haloo rifeergareeyo dhamaan cashuur-dhaafka dhiiri galinaya warshadaha ee la xidhiidha macaashul macaashka mishiinada warshadaha**, alaabada caydhin iyo soo dejinta qalabka warshadaha waxa loo raaci doonaa xeerka warshadaha qodobkaana waan ku waafaqay oo waxaan idhi halaga dhigo Qodobka 25aad ee xeerka.

**Md. Axmed Maxamed Cabdilaahi (Fanax)** (1min, 1sec)**: -** Bismilaahi Raxmaani Raxiim Gudoomiyaha, mudanayaasha Golaha, shaqaale waynaha salaamu calaykum waraxmatulah wabarakaatu, ugu horay waxaan umahad celinayaa Gudigii loo xilsaaray xeerkan in ay inuu soo ururiyaan mar labaad **waxaan ayidayaa oo aan taageerayaa sidii ay qodobada u soo xuleen inooguna soo jeediyeen Guddigaasi in sidaa loogu codeeyo oo aynu ku ayidno,** taasina waxay muhiim u tahay habsami u socodka shaqada Gollaha markaa waxaan anigu ayidayaa soo jeedintii ay soo jeediyeen Guddi loo xil saaray xeerakan.

**Md. Maxamuud Jaamac Koodbuur** *(11min, 17sec):-* Bismilaahi, Gudoomiye marka hore waad mahadsan tahay, anigu waxaan qabaa anigoo ayidsan soo jeedinta labada qodob ee ka timi Madaxweynaha iyo Gudidda oo ku mahadsan hawsha ay soo qabteen.

Xeerkani mar haduu ina horyimi qodobada muhiimka ah ee aan buuxinaynin shuruudaha caalamiga ah ee ka maqan ama qabyada ah aynu ku darno oo aanay dooddu ku koobnaanin labadaas qodob ayaan soo jeedinayaa.

Labada qodob sida gudiddu u soo jeedisay ayaan u taageersanahay, laakiin waxaan ku kordhin lahaa **Qodobka 17**aad qayb ah taas oo ah in heerar kala duwan loo sameeyo rasamaalka maalgashiga Nidaam Tiered Threshold ah (Somaliland), Iyadoo aan la dhaawaceyn qodobka 17aad, raasamaalka ugu yar ee maalgashi waxa loo kala saarayaa heerar sidan ah:

1. **Heerka 1aad – Maalgashi Istiraatiiji ah (Large / Strategic Investment)**
   a) Maalgashi Istiraatiiji ah: USD 300,000 iyo ka badan
2. **Heerka 2aad – Maalgashi Dhexdhexaad ah (Medium Investment)**
   b) Maalgashi Dhexdhexaad ah: USD 100,000 ilaa USD 299,999
3. **Heerka 3aad – Maalgashi Yar / Hal-abuur (SMEs & Startups)**
   c) Maalgashi Yar / Hal-abuur: USD 50,000 ilaa USD 99,999
4. **Golaha Wasiirradu waxay xeer-hoosaad ku qeexayaan:**
   a) noocyada mashaariicda heer walba;
   **b) dhiirrigelinta ku xidhan heer kasta;**
   **c) shuruudaha wax-qabadka iyo kormeerka.**

Sidoo kale, madaama ay jaanis u haysano xeerka wixii ka qabyo ah ama ka dhiman si uu u buuxiyo shuruudaha caalamiga ah ee ka maqan xeerkii hore ee Xeer Lr. 91/2021, marka waxaa ii soo baxay goldoloolooyin uu leeyahay xeerkaas ama sababta iyo muhiimada kaabista iyo wax ka badelka aan isleeyahay in wax lagu kordhiyaa waa muhiim.

Sida Qodobada maalgaliyaha ku dhiirigalinaya ee xeerka hore ay dhamaystiran yihiin, balse waxa la moodaa la moodaa in xeerkaas hore uu ku liito dhinaca ilaalinta casriga ah ama daahfurnaanta iyo nidaamka muranada caalamiga ah.

Marka qodobada aan isleeyahay way ka dhiman yihiin xeerkaas hore oo aan soo jeedinayaa ama ku daryaa waxa weeye **Qodobka 3aad ee u jeedooyinka xeerka** waxaan ku dari lahaa **"In la dhiirrigeliyo maalgashi waara oo mas'uuliyad leh, In la ilaaliyo danaha qaranka iyo madax-bannaanida sharciyeed, In la hubiyo daahfurnaan, cadaalad, iyo kalsooni sharci iyo In la dejiyo nidaam casri ah oo xallinta murannada maalgashiga"**

**Qaybta Labaad ee Mabda'a Iyo Dahfaafnaanta, Qodobkeeda 6aad ee Mabda'a Guud iyo Daahfurnaan waxaan ku kordhin lahaa**

- Dawladda Jamhuuriyadda Somaliland waxay xaqiijinaysaa in dhammaan maalgashiyada lagu maamulo si daahfuran, cadaalad ah, oo aan takoor lahayn.
- Xeerkan wuxuu aqoonsan yahay mabda'a **UNCITRAL Transparency in Treaty-based Investor–State Arbitration**.
- Murannada maalgashiga waxaa lagu dabaqayaa: a) Daabacaadda go'aannada iyo xukunnada; b) Dhegeysiyo furan marka ay suurtagal tahay; c) Oggolaanshaha faragelinta dhinacyo saddexaad (amicus curiae) marka ay jirto dan guud.

**Qaybta Saddexaad Maalgashadaha iyo Wajibaadkiisa, Qodobka 14aad: Ilaalinta Maalgashiga iyo Magdhowga, waxaa ku kordhin lahaa**

- Maalgashi kasta oo sharci ah waa la ilaalinayaa.
- Haddii la-wareegid ama tallaabo u dhiganta la-wareegid dhacdo, magdhowgu waa inuu: a) Ku salaysnaadaa **Fair Market Value (FMV)**; b) Noqdaa mid degdeg ah, ku filan, oo wax-ku-ool ah; c) Raacaa habraac sharci oo dhammeystiran (due process).

**Qodobka 14aad** qaybta kale ee aan ku kordhin lahaa waxaa weeye **Waajibaadka Maalgashadaha,** Maalgashaduhu waa inuu:

- U hoggaansamaa dhammaan shuruucda Jamhuuriyadda Somaliland;
- Ka fogaadaa musuqmaasuq, laaluush, iyo khiyaano;
- Ilaaliyaa deegaanka, shaqaalaha, iyo bulshada deegaanka;
- Qaadaa mas'uuliyadda khasaare sharci-darro ka dhasha.

**Qaybta Afraad ae Ka-reebista Faa'iidooyinka, Qodobka 20aad A** ayaan ku dari lahaa Denial of Benefits oo ah:-

- Dawladda Jamhuuriyadda Somaliland waxay ka reebi kartaa faa'iidooyinka xeerkan maal-gashade: a) Aan lahayn hawl ganacsi oo dhab ah; b) Lagu dhisay treaty-shopping ama shell company; c) Khatar ku ah amniga, canshuuraha, ama danaha qaranka.
- Go'aankan waa inuu noqdaa mid qoraal ah, sababeysan, oo waafaqsan due process.

**Qaybta Shanaad ee Xallinta Murannada, Qodobka 28aad ee Xallinta Murannada Maalgashiga, waxaan ku kordhin lahaa**

- Murannada ka dhasha maalgashi waxaa lagu xallin karaa: a) Maxkamadaha Jamhuuriyadda Somaliland; b) Dhexdhexaadin hoos timaadda **UNCITRAL Arbitration Rules**; c) Hab kale oo caalami ah oo Dawladdu oggolaatay.

**Qodobka 28 qaybtiisa labaad oo ah Oggolaanshaha Dhexdhexaadinta** "Xeerkan laftiisu wuxuu ka dhigan yahay oggolaansho hore (standing offer) oo Dawladdu ku aqbalayso dhexdhexaadin marka maal-gashaduhu aqbalo".

**Qaybta lixaad ee dib u celinta iyo is-bedelka lacagta, Qodobka 22aad ee Dib-u-celinta Raasamaalka iyo Faa'iidada, waxaan soo jeedinayaa in lagu daro.**

- Maalgashaduhu wuxuu xaq u leeyahay inuu si xor ah u celiyo raasamaalkiisa iyo faa'iidadiisa.
- Lacagta waa in loo beddelaa si waafaqsan sicirka suuqa.
- **Farqada 3aad,** Xaddidaad kumeelgaar ah waa la oggol yahay oo keliya si loo ilaaliyo xasilloonida dhaqaale.

**Qaybta Toddobaad Qodobbada Kala-Guurka, Qodobkiisa 35aad ee Kala-Guurka, farqadahan ayaan ku kordhin lahaa.**

- Xuquuq kasta oo si sharci ah u dhalatay ka hor xeerkan way sii jiraysaa.
- Murannada socda waxay dooran karaan in lagu xalliyo xeerkan ama kii hore.
- Xeerkan ma burinayo heshiisyo hore oo Dawladdu saxeexday.

**Md. Maxamuud Saalax Cabdi** (1min, 23sec): - Bismilaahi Raxmaani Raxiim Shir-gudoonka iyo Xildhibaanada ASC. Waxaan tageerayaa soo jeedinta gudidda ee labada qodob ka koobanayd ee ku kaabsan wakhtiga iyo saddex boqol oo kun inuu maalgashaduhu uu ka bilaamo dakhliga, WSC.

**Md. Axmed Dayib Aadam (kucadeeye)** (1min, 45sec):- Bismilaahi Raxmaani Raxiim ASC, Mudane Gudoomiye iyo Mudanayaal, ugu hareeyana waxaan tageerayaa aragtidii **Xildhibaan Cabdikariim iyo xildhibanad Aamina Cilmi Fariid iyo Xildhibaan Koodbuur**

**Maxamed ee ahayda in alaabta caydhin xeerka sideedi hore loogu daayo** waayo ilaa 50 warshadood ayaa inaga xidhamay, dhaqaalihii lagu maalgaliyeyna wuu inagaga khasaaray, warshaduhu shaqaale ayey inoo hayaan, sida la sheegay cashuuro ayaa ka soo hoyata, markaa markasta oo aynu culaysa saarno cidhiidhi ayaa fuulaya iyadoo duruufo badan oo ku xeerana ay jiraan.

Sidaa awgeed, **anigu waxaan tageerayaa ina qodobkaa sidiisi xeerka loo daayo**, qodobada kale sidooda ayaan ugu tageersanahay, **waxa kale oo aan si gooni ah u sii tageerayaa xildhibanadii kala saaray xadiga maalgashiga ee uu Xildhibaan Cali ka mida ahaa**.

Waxa kale oo aan soo jeedinayaa, laba qodoba oo kale Gudoomiye sida uu sheegay Xildhibaan Koodbuur maadaama uu xeerkii waynaa uu ku jiro wax ka badal iyo kaabis in xeerka si mug leh loo eego, **waxaan soo jeedinayaa ina guddi gaar ah (ad hoc committee) diba loogu saaro in labadan nuqul ee isa saaran lasoo kala saaro taasna waan soo jeedinayaa**. Waxa labaad ee aan soo jeedinayaa ina la sameeyo nuqul afka labaad ee qaranka ku qoran oo ah afka carabiga.

**Md Xirsi Cabdilaahi Xirsi** (2mint 1sec):- Bismilaahi Raxiim Xeerka waxaan ku soo koobayaa labadii qodob ee ay guddidu taabatay, madaxweynuhuna soo gudbiyey, laakiin waxooga wax ka badela oo aan ku raacsanahay xildhibaan Cali iyo xildhibaanadii ka horeeyey.

Marka hore, waxaan kala saarayaa maalgashiga laga doonayo qofka ajaanabiga ah iyo qofka muwaadinka ah, markaa kaa muwaadinka waxa aynu ku daynay kii hore ee boqolka kun haduu maalgashado loo aqoonsanayo maalgashade, **halka qofka ajaanabiga ahna afar boqol oo kun** oo doolar laga dhigo si ay u kala cadaato xuquuqada ay kala leeyihiin runtiina u kala duwanaadan xuquuqada qofka ajaanabiga ah iyo ka muwaadinka ahi u kala cadaato.

Sidoo kale, waxaan wax ka badel ku samaynayaa **Qodobka 24aad** oo ay guddidu ku raacday sidii uu Madaxweynuhu ku soo gudbiyey, laakiin anigu halkaa qabo, **Qodobka 24aad farqada 2aad** maalgashade kasta oo la siiyey shaahadada maalgashu waxa uu xaq u leeyahay inuu helo cashuur dhaaf cashuurta kastamka oo ah 100% ee la xidhiidha soo dejinta alabta caydhin, alaabooyinka kale ee loogu talagalay wax soosaarka, halkay saddexda sano ee hore oo ka bilaabmaysa marka mashruuca shaqada bilaabo, **halkay saddex sano ka tahay waxaan soo jeedinayaa ina shan sanno laga dhigo oo laba loogu kordhiyo.**

Mudane Gudoomiye, warshadaha dalkeena ka jira inkastoo xeer gaara aynu warshadaha usameynay oo sida uu sheegayo dhaqanka xeerarka dalkeenu, marka uu xeer gaara soo baxo waxa uu nasakhaa wax yaabihii xeerka kale ku jiray oo dhan marka insha'alah marka aynu xeerka warshadaha galno aynu faahfaahintiisa galno.

Qodobkan ay guddidu ku soo dartay hadii laga saaro iyo hadii kaleba warshaduhu waxay u guuri doonaan xeerka warshadaha, halkaa ayeynu kaga hdlaynaa cashuur dhaafidooda iyo qaabka loo dhiiri galinayo markaa taasna doodaas ayeynu u dayn doonaa. WSC.

**Md. Cabdikariin Meecaad Isaaq(** 5min,40 sec):- Bismilaahi Raxmaani Raxiim Asalaamu calaykum waraxmatulaahi wabarakaato waaan salamaayaa mudanayaasha Gollaha, Gudoomiyaha Gollaha iyo shaqaale waynaha Gollaha, Xeerka maalgashiga inkasta oo lifaaqii Guddiga aynu daba socono, horta waa xeer balaadhan oo u baahnaa in wax laga qabto, hawlo badana ay ku xanibnaayeen waxaad moodaa xeerka maalgashiga in ay dodo badan ka taagan yihiin oo aynu kala garan laanahay qofka maalgashada ah iyo qofka ganacsadaha ah.

Marka ugu horaysa waxaa wanaagsanaan lahayd in xeerka maadaama oo ay xukuumadu Qodobo kasoo taataabatay in Xeerka gabi ahaantii lagudo-galo ayay ku wanaagsanayd sababtoo ah waxaynu kala garan laanahay maalintii ay inoo yimaadeen wasaarada maaliyada iyo wasaarada maalgashigu labadooduba waxay kala garan waayeen qofka Ganacsadaha iyo qofka maalgashadaha ah Ninka Dukaan leh ee afar albaab usameeya ma ganacsadaa mise waa maalgashade waa ganacsade dukaan kiisii wayneeyay.

Maalagashadaha waxa loo yaqaanaa qofka maalgaliya material ama wax macdan ah oo Dalka yaala haday noqon lahayd sida Beeraha, kaluumaysiga, macdanta wax dalka yaala wixii maal galiya ayaa maalgashi la yidhaahdaa laakiin maalgashade lama yidhaahdo Nin dukaankiisii inta uu balaadhiyay ku soo kordhiyay 4 jawaan oo Bariis ah halkaa soo dhiga oo yidhaahda 100 kun ayuu ku maal galiyay anigu waxaan jeclaan lahaa qofka maal-gashada ah ee muwaadinka ah halka looga dhigay 100kun maalgashadahaasi waxa uu helayaa cashuur-dhaaf waxaa dhacdey in qof shahaado ku soo qaatay 100 kun ah cashuur dhaaf ku helo qalab gaadhaya 500 kun ilaa 600 kun isla markaana ay usii gudbaan dalka dibadiisa oo ayna dalka waxba lagaga qaban.

Anigu waxaan soo jeedin lahaa in la cayimo qofka muwa100adinka ah ee maalgashadey 100kun iyo wixii ka badan in la ogaado lana- cayimo wixii uu xaq uyeelanayo ee cashuur-dhaaf ah ee uu waajibinayo Xeerka cashuuruhu.

Waxaan kale oo aan soo jeedin lahaa Ajaaniibt 400kun in ay lacag yar tahay maalgashi marka laga hadlaayo waxa la maalgashanaayo in ay yihiin wax dalka anfacaaya oo usoo kordhinaaya shaqaale, ama Dakhli soo gala dalka laakiin uma arkayo 400 in ay tahay lacag maalgashi Rasmi ah oo cid ajaanib ah lagu aamini karo, **waxaan qabaa in** laga **dhigo wixii ka badan 1 milayan qofka ajaanibka ah ee halkan imanaya waayo intooda badan waxay diyaar uyihiin in ay maalgaliyaan lacag ka badan intaa oo maalaayiin kor udhaafaysa**.

Halka qofka muwaadinka ah looga dhigayo in lays weydiiyo qofka muwaadinka ahi muxuu maal galinayaa, maalgashiga qofka muwaadinka ah uu maalgalinayo aynu

isweydiino, 100kun dukaan ayuu ku maal galinayaa sidaa darted dalkeenu waxa kuu ku nool yahay waa cashuur, inagu malihin warshado-wax soosaar ama wax-wayn oo aynu dakhli ka helno, waxaynu ku nool nahay cashuurta laga aruuriyo dadka ayaa dib looga dhigaa mushaharo, iyo Amniga lagu ilaaliyaa dalka, markaa maalgashigu hadii ku soo noqonayo intii yarayd ee aynu ku noolayn in la eego si wanaagsan maalgashigu in uu noqdo muwaadinka ka 500kun wixii ajaanib ahna 5malyan iyo wixii ka sareeya in laga dhigo ayaan qabaa gudoomiye.

Qodobka 24aad eek u saabsan cashuuraha ee loo waafajiyay 100% anigu qodobkaa waxaan soo jeedin lahaa qofku haduu 100kun uu maalgashadey 50% in lasiiyo cashuur dhaaf oo aan la siin 100% oo cashuur dhaaf ah si loo ilaaliyo, dalka waxa amniga lagaga shaqeeyaa 100% waxay ka yimaadaan waa cashuurtaa yare e umadda laga aruuriyo markaa hadii aynu usamaysano fursado aynu kaga faaiidaysano in cashuurtaasi ay ku baxdo siyaabo kale oo looga faaiidaysto, Dalka waxaa ugu xiniyi buur-buuran ganacsatada dalka haysata ayadaana inta badan dalku gacanta ku haysa dawladnimada iyo ganacsatadu wey kala hor koreen dalkeena.

Markaa hadaan la ilaalin shuruucdana loo eegin laguna adkaynin waxaa dhici karta in ay soo baxaan fursado lagaga faaiidaysto cashuuraha in lagu lunsado isla markaana wax-soosaarka cashuurtu uu dib u dhaco, anigu waxaan soo jeedin lahaa in si wanaagsan loo kordhiyo maalgashiga lana- cadeeyo lana qeexo cida noqonaysa maalgashade ama helaysa shahaadada maalgashiga.

Qofka maalgashadaha noqonaya waxaan qabaa maadama oo ay xildhibaanadu iweydiiyeen in aan cadeeyo qofka maal-gashadaha ah waa qofka maal galiya wax-soo saarka dalka lacagtiisana ku maal galiya sida, BEERAHA, XOOLAHA, KALUUMAYSIGA, MACDANTA iyo wixii la mid ah ayaa loo baahan yahay inuu maalgaliyo qofka maalgashadaha ahi,waa in uu noqdaa wax dalka yaala oo kharash lagaliyo oo wax lagu soo saaro laakiin maalgashade ma noqonayo ninka keenay 10 caagadood oo saliid ah, iyo 10 kiish oo jawaan ah oo Bariis ah  ama dukaan lagu furay 100kun oo dollar laguma noqonayo maalgashade.

**Md, Xasan Cumar Xasan (x.ogaal) (1min, 54sec)**:- Bismilaahi Raxmaani Raxiim Gudoomiyaha Gollaha wakiilada, mudanayaasha Gollaha wakiilada, shaqaale waynaha waan salaamayaa, Aslaamu calaykum warx matulaahi wabarakaato, lifaaqan Guddiga siyaasada arrimaha dibada caalamiga ah qorshaynta iyo maalgashigu, ay soo gudbiyeen waxa uu markii hore ka koobnaa laba Qodob oo kala ah qodobka 23aad iyo qodobka 24aad ee inooga yimi madaxwaynaha Guddigu labadaa qodob sida ay usoo dhigeen iyo soo jeedin toodii ayuun baan rabaa in aan siguud usheego iyo qodob cusub oo ay ku soo dareen.

Guddigu waxay inoo sheegtay in labadaa qodob ee 23aad iyo 24aad in ay ayideen kaabistii iyo wax ka badalkii lagu soo sameeyay isla mar ahaantaana ay qodob cusub ay ku dareen.

Qodobkaa cusub oo odhanaaya cashuur dhaafka dhiirigalinta warshadaha guud ahaan cashuur dhaafka lagu dhiiri galinaayo warshadaha ee la xidhiidha macaash-macaashka, mishiinada warshadaha alaabta caydhin ee warshadaha iyo soo dejinta qalabka warshadaha waxaa loo raaci doonaa xeerka horumarinta warshadaha maadaama oo mudane gudoomiye labadaa qodob oo markii horena lifaaq ahaan loogu keenay ay soo ayideen soo jeedintii qodobkaa cusubna ay ku dareen, **Waxaan ayidayaa soo jeedintii Guddiga ay soo jeedisay.**

**Md. Yaxye C/laahi Aamiin** *(01min, 11sec):-* Bismilahi, Rahmani, Raxiim; Gudoomiye ku xigeenka 1[aad] ee Golaha wakiilada, Mudanayaasha Golaha Wakiilada, Shaqaalaha iyo bahda saxaafada Asalaamu calaykum.

Labada **Qodod ee 23[aad] iyo 24[aad]** waxa aan ku waafaqsanahay sidaa ay gudidu u soo dhigtay taas oo hawl fiican ay ka soo qabteen, waxa se ku darayaa **Qodobka 17[aad]** ee maalgashiga waxaan jecelahay in la kala saaro Muwaadinka iyo ajenebiga oo ninka muwaadinka ah sidaa gudidu ay u soo dhigtay 300,000 ayaan ku waafaqsanahay, laakiin ninka ajenebiga ah waa inuu la yimaadaa wax awoodeena ka baxsan haday aqoon tahay iyo haday maal tahayba markaa qodobkaa in lagu daro oo **aanu cayino malyuun iyo wax ka badan sida uu Meecaad sheegay**. Wa Salaamu calaykum.

**Md. Aaadan Cusmaan Xarbi (02min, 4sec):-** Bismilahi, Raxmaani, Raxiim, Gudoomiye iyo Mudanayaal waa salaamantihiin dhamaan.

Haddaan dooddayda galo arrinta koobaad ee ahayd arintii ay soo jeedisay xukuumadu ee ahaa **Qodobka 23[aad] iyo 24[aad] oo ka hadlaayay cashuur dhaafka shirkadaha iyo maalgadayaasha waxaan aad u waafaqsanahay sidaa ay xukuumadu u soo dhigtay labadaa qodob.**

**Qodobka 17[aad] oo ka hadlaaya lacagta maalgashiga ee yareyd oo marka horeba 100,000 ahayd imikana 300,000 ka dhigeen waxaan taageersanahay xildhibaanada Meecaad iyo Yaxye iyo xildhibaanadii kaleba in horta wixii ajaanib ah;** lacagta maalgeshiga ah ee ay dadka galinayaan ay noqoto lacag buuran, lacagta dadka wadaniyiinta ah ee wax maalgashanayana la qiimeeyo waxa ay maalgashanayaan iyo waxa ay tahay oo lagu qiimeeyo, wixii ajaanib ahna ay noqoto wax inaga awood badan ay dalka keenaan oo lacagta ay maalgashanayaan inaanay ka yaraan hal million.

Qodobka u danbeeya ee inamadu xaga danbe kaga soo qoreen gudida ee maalintii dhawyd aan ka hadlaayay cashuur dhaafka in loo raaco xeerka wershadaha waxaan ku taageersanahay xildhibaan Cali in sidaa loo daayo waxaanan jeclahay in qodob ahaan uu xeerka u galo imika waxa weeyaan lifaaqa uun buu xaga danbe kaga qoran yahay ee qodob maaha si marka xeerka la qoraayo qodob ahaan loo geliyo. Aad baa u salaamantahiin Wasalamu calaykum.

**Md. Saleebaan Axmed Carab** (04 min, 5sec):- Bismilahi, Raxmaani, Raxiim, Alxamdulilahi Gudoomiyaha, Mudanayasha, Shaqaalaha iyo Saxaafadaba Asalaamu calaykum kolay doodu in doora ayay socotay gebogebo ayay ku dhawdahay, horta marka hore waxaan aad u taagerayaa u soo dhawaynayaa soo jeedintii xukuumadu soo jeedisay soo codsatay labadaa qodob gudidiii ka soo shaqaysay ka soo baarandagtay ee inoo soo tafatirtayna aad baan ugu celinayaa;

Qodobada maalgashiga, maalgashigu waa magac weyn oo wax yar yarna waa noqon karaa wax waaweyna waa noqon karaa markaa sida uu ukala muhiimsan yahay in loo kala tixgaliyo;

Maalgashigu inta badan wuxuu hoos tagayaa wershadaha oo maalgalintu wershadaha uun bey u badataa wadanka wixii la soo gelinayo inay xaga wershadaha noqoto ayaa laga yaabaa, markaa wixii warbixin iyo ka hadal ah iyo hagaajinteeda iyo toosinteedu waxay iman doontaa marka xeerka wershaduhu yimaado.

Maalgashigan aynu imika ka hadlayno ee ina hor yaala Raw material-ku aad iyo aad bay muhiim u tahay in si qoto dheer oo faahfaahsan loo eego waayo waxa laga yaabaa wershadaha la sameynayo ee halkan lagu maalgalinayo iyagoo material iyo alaabtii ah ayay dibada inooga imanayaan waxa laga yaabaa halkan isku xidh xidh iyo wax lamid ah mooyaane wershada laga sameeyo wadanka ee aynu wadankeena ka maalgalino ee maalgashigiina soo galaysa in dhamaanteed waxa ay u baahantahay dibeda ka timaado ayaa laga yaabaa; maadama alaabta oo dhami iyadoo Raw material ah ay dibada ka imanayso inay ka badalaato oo qiimaha iyo u jeedadii laga lahaa si looga baarandago oo

ay wershad uu wadanku leeyahay oo xamili karta in ay wadanka dhaqaalahiisana wax ka tarto shaqaale abuur badana sameysa,

Waxa lagu gaadhi karaa in Raw material ka imanaya ee dibeda ka soo dagaya fudadayntiisa iyo cashuur dhimidiisa aad iyo aad looga baarandago inta ay lugaheeda isku taagayso, markaa waxaan soo dhaweynayaa oo aan ku raacsanahay in Saddexda Sano Laba sano loogu daro oo ilaa 5 sano lagu ilaaliyo in ay kab kabanto oo ay is bixiso oo dhaqalaheedu uu noqodo mid dagan markaas ayay wixii kale ee waajibaad ah ee ah macaash macaash iyo inay dhamaystiranto cashuurteedii kaleeto ay hirgalaysaa. Waxaynu aragnay wershado badan oo imika xidhmayba ama aad imika siday u shaqeeyaan ay u adagtahay markaa sidaas oo dhan in la is waafajiyo oo mar walba waxa wax dhimi kara ee ay kuna socon karayso waa in uun cashuurta uun laga dhimo inta ay is bixinayso markaa intaa uun baan ku kabi lahaa Wasalaamu calaykum.

**Md. Yuusuf Faarax Warsame (01min, 2sec):-** Bismilaahi, Rarxmaani, Raxiim, Gudoomiye ku xigeenka Golaha wakiilada, Mudanayaasha, Shaqaalaha iyo Saxaafada dhamaan waa salamayaa xeerkan maalgashiga waxa ay xukuumadu inoo soo gudbisay laba qodob **waxaan doonayaa ``ana inaan ku ekaado uun inaynu ansixino uun labadii qodob ee xukuumadu inoo soo gudbisay oo aynu sidoodii u qaadano horta oo aan wax kale oo badhax ah lagu darin** waayo xeerku in badan buu ina agyaalay markaa waxaan jeclahay inaynu xeerkaa sidaa ku ansixino labadaa qodob ee xeerka sidii xukumadu ku soo gudbisay inaynu ku sii dayno uun baan anigu qabaa.

Waslaamu calaykum waraxmatulah.

**Md. Jamaal Cali Aadan (01min, 02sec):-** Bismilaahi, Raxmaani, Raxiim, Alxamdulilahi Rabbil caalamiin Mudane Gudoomiye iyo Mudanayaan Asalaamu calaykum.

Mudane Gudoomiye iyo Mudanayaal aniga oo tixgelinaya danta guud ee qaranka isla markaana ka duulaya baahida loo qabo dheelitirka iyo dhiirigalinta kor u qaadida dakhliga dalka **waxaan soo jeedin lahaa in la ansixiyo soo jeedinta Madaxweynaha JSL ee wax kadalka iyo kaabista xeerka maalgashiga qodobka 23aad iyo 24aad. Aad iyo aad baad u mahadsantahiin.**

| **Cawad Cali Maxamed** | **C/risaaq Siciid Ayaanle** |
| --- | --- |
| **Agaasimaha waaxda Hadal Qoraalka G/G/Wakiilada** | **Xoghayaha Guud ee Golaha wakiilada JSl** |
| ---------------------------------------------------- | -------------------------------------------- |